Heritage Institute for Policy Studies
Policy Brief
10
02 | 2015

# Federaalka Soomaaliya: Ma ahan hadii, laakiin sidee

## Qodobada daraasadda ugu muhimsan

- Inta badan dadka aan xog ururinta ka sameynay waxa ay u arkaan federaaka in uu yahay hannaanka maamul ee ugu habboon ee xukunka loogu baahin karo Soomaaliya sababtoo ah waxa uu fududeynayaa awood qeybsi u dhexeeya qabiilada, waxa uu keenayaa in ay gobollada madaxbannaani helaan, iyo ugu danbeyn in uu colaadda yareynayo;
- Inta badan dadka xog uruurinta laga sameeyay waxa ay u arkaan habka federaaleynta hadda socota mid khaldan, waxa ayna ku sababeeyeen in cidda hoggaaminaysa federaalaynta ay yihiin dabaqadda sare iyo in uu yahay nidaam kor laga hago taas oo sare u qaadeysa aqoonsiga qabiillada intii la tixgelin lahaa muwaadinnimo;
- Dib u heshiisiin bulsho waxa loo arkay in ay shardi u tahay hirgelinta federaalka Soomaaliya;
- Inkastoo taageero ballaran loo hayo hannaanka maamul ee federal, heerka fahan ee bulshada iyo dadka qo'aannada siyaasada qaata ee ku aaddan nooca federaalka ku habboon Soomaaliya iyo sidoo kale farqiga u dhexeeya habka loo baahan yahay waxa uu yahay mid aad u hooseeya, taas oo muujineysa baahida loo qabo olole wacyigelin bulsho oo aad u xooggan;

## Raad-raac

Inkasta oo ka hadalka federaalka Soomaaliya ay dib ugu laabaneyso ka hor xornimadii dalka, kahadalka waqtigan waxa uu soo bilowday bilowgii 1990-kii. . Laakiin federaalka si rasmi ah looguma qorin dastuurka Soomaaliya ilaa 2004 xilligaas ee uu socday geeddi-socodkii nabadda ee lagu qabtay Embagathi, Kenya shirkaas oo lagu sameeyay Dowladdii Federaalka Kumeelgaarka ahayd, taas oo waddada usii xaartay dowladdan federaalka ah ee Soomaaliya.

Inkasta oo ay jirto rabitaan xooggan oo ku qoran Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya, haddana dowladihii kala danbeeyay ilaa 2004-tii waxa ay ku guuldareysteen in ay dhaqan geliyaan federaalka sababta oo ah xukunkooda ma gaarsiisnayn meelaha ka baxsan caasimadda Muqsdisho. Doorashadii Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud ee dhacday Sebtembar 2012 kaddib ayaa la bilaabay dhaqan gelintii rasmiga ahayd. Laakiin xitaa xilligaas, habka dhaqangelinta waxa uu ahaa mid ka fiirsi iyo qorshe la'aan ku dhaca mar kastana ma waafaqsaneyn dastuurka kumeelgaarka ah.

Dastuurka kumeelgaarka ah waxa uu waajibinayaa labo gobol iyo wixii ka badan (kahor 1991) in ay isku biiri karaan si ay u sameystaan maamul/dowlad goboleed. Taa waxaa sii dheer, dastuurka waxa uu sheegayaa sameynta Guddiga Xuduudaha iyo Federaaleynta (GXF), oo ah guddi madaxbannaan loona idmaday in ay qiimeeyaan sharci ahaanshaha iyo dhaqan gelinta maamullada cusub kahor inta aan la ogolaanin. Labadan qodob oo uu Dasturku waajibiyay waa leyska indha tiray marka la eego hannaanka hadda wax ku socdaan.

Waxa aan ku jirin Puntland, taa oo ka horreysay maamulada hadda la aqoonsaday. Iyadoo Waqooyi Bari Soomaaliya laga sameeyay 1998-dii, dalka waxa si weyn looga tixgeliyaa in ay tahay maamul/dowlad goboleedkii ugu horeeyay ee sameysma. Waxa ay aheyd u doodaha ugu weyn ee hannaanka federaalka tan iyo markii la sameeyay. Puntland waxa ay ka ciyaartay door muhiim ah qorista Dastruurka Kumeelgaarka ah ee hadda lagu dhaqmo intii ay socdeen shirarkii Garowe I iyo Garowe II ee qabsoomay 2012-kii. Puntland waxa ay ku faafsantahay shan gobol, inkastoo aanay si dhameystiran u wada maamulin dhammaantood. Bari iyo Nugaal ayaa si dhameystiran u hoos taga, halka qeybo kamid ah Sool, Sanaag iyo Mudug ay hoos tagaan maamullo kale.

Iskudaygii labaad ee aadka u weynaa waxa uu ahaa Jubbaland. Bishii May 2013, siyaasiyiin ka socday gobollada Jubbada Hoose, Jubbada Dhexe iyo Gedo ayaa isugu yimid magaala xeebeedka waqtiga dhaw lala wareegay ee Kismaayo. Waxa ay si iskood ah ugu dhawaaqeen Jubbaland in ay tahay maamul/dowlad goboleed cusub taa oo ay aad u taageertay Kenya oo ilaa 4,000 ciidan ka joogaan magaalada Kismaayo. Wufuudda ka qeyb gashay shirka waxa ay ku dhawaaqeen in Axmed Maxamed Islaan (Madoobe) uu yahay maxadweynaha Jubbaland.

Machadka **Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda** waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Dowladda Federaalka taa aad uma soo dhaweynin, waxa ayna si degdeg ah u diidday maamulka cusub iyada oo carrabka ku adkeysay in habka loo maray aanu ahayn mid dastuurka waafaqsan sababto ah qabiillada degan gobolladaas oo dhan kama qeybgalin, sidoo kale ma ahayn doorasho si cad u dhacday. Taa waxaa sii dheer, Dowladda Federaalka waxa ay ku eedeysay in doorkeedii dastuuriga ahaa ee sameynta dowlad goboleedyada aan la siinin.

Waxa taa ka danbeeyay colaad dhimasho sababtay oo u dhexeysay taageerayaasha maamulka cusub iyo kuwa kasoo horjeeday oo ay taageereysay Dowladda Fedeaalka. Kadib shan bil oo qalalaaso ah, Ethiopia ayaa dhexdhigtay heshiis  kaa oo u arkay sameysanka maamulka kumeelgaarka ah ee Jubba mid kusoo celinaya dhabaha waafaqsan dastuurka si ay u noqoto xubin buuxda ee katirsan Dowladda Federaalka ah. Ku dhawaad sanad iyo bar, inta badan wixii lagu heshiiyay, oo ay ka mid ahaayeen in si wadajir ah loo maamulo ilaha muhiimka ah ee dhaqaalaha (Dekadda iyo Airport-ka) wali lama fulinin.

Iyadoo Mamulka Kumeelgaarka ah ee Jubba uu la halgamayay helitaanka aqoonsi sharci ah ee noqoshada xubin katirsan Dowlad Goboleedyada, qaban-qaabo kale ayaa ka bilaabatay Baydhabo bartamihii 2014. Siyaasiyiin sarsare ayaa isugu yeeray wufuud isugu jirta odayaasha dhaqanka gobollada Bay, Bakool iyo Shabeellaha Hoose iyadoo ujeedada  ay ahayd sameynta Maamul/Dowlad Goboleed ay iyaga leeyihiin. Sidii maamulkii Jubba oo kale, natiijada waxa ay ahayd mid horey loo sii ogaa. Nofembar 2014, wufuuddii waxa ay u doorteen Sharif Xasan Shiikh Aadan, oo ahaa xildhibaan iyo afhayeenkii hore ee baarlamaanka federaalka, in uu noqdo madaxweynaha maamulka/dowladda Koonfur Galbeed. Beesha caalamka oo iyadu maalgelisay shirka waxa ay si buuxda u amaantay natiijada kasoo baxday shirka in ay tahay guul weyn iyo tallaabo horey loogu qaaday hannaanka federaakeynta.

Diyaargarow ayaa hadda ka socda gobollada dhexe kaa oo lagu sameynayo dowlad/maamul goboleed kale. Aragti ahaan, waxa ay ka koobnaa doontaa gobollada Galgaduud iyo Mudug, inkastoo waqooyiga Mudug ay u badan tahay in ay kasii mid ahaadaan maamulka Puntland oo ay katirsanaayeen ilaa 1998-dii. Gudddiga farsamada ee loo igmaday diyaarinta sameysanka maamulkan waxa ay caddeeyeen in degmada Cadaado ay marti gelin doonto shirkan oo ugu danbeyn soo saari doona maamul.

Dhammaan howlahan waxa ay dheceen iyada oo aanu jirin Guddigii Xuduudaha iyo Federaalka. Bishii Disember 2014, baarlamaanka federaalka ayaa ansixiyay sharciga sameynta Guddiga Xuduudahaiyo Federaalka, inkastoo guddigii aan wali la magacaabin miisaaniyaddii ay ku shaqeyn lahaayeenna aan laysku waafaqin. Aragti ahaan, guddigan waxa uu dib u qiimeyn doonaa sharci ahaanshaha iyo hirgelinta maalul/dowlad goboleedyada soo ifbaxaya.

## Habka daraasadda loo sameeyay

Marka la eego maqnaashaha guud ee xog lagu kalsoonaan karo iyo baahida weyn ee loo qabo go'aan qaadasho ku saleysan caddeymo iyo cilmibaaris, waxa aan sameynay cilmibaaristaan ballaaran si aan u buuxinno farqiga jira ee fahanka federaalka, kor u qaadista wacyiga dadka iyo ugu danbeyn wargelinta iyo wax ku biirinta talada siyaasadda.


Wadar dhan 213 qof ayaa xog uruurintan laga sameeyay ee ku kala nool shan magaalo: Muqdisho, Baydhabo, Kismaayo, Galkacyo iyo Garowe. Shaqsiyaadkan waxa ay ka qeyb qaateen aragti-is-dhaafsi uu soo qabanqaabiyay Machadka Heritage. Ka qeybgalayaasha waxa ay ku kala duwanaayeen jinsiga, da'da, iyo xirfadda, inkastoo tiro badan ee ah (38%) ay ka shaqeynayeen dowladda iyo ururada aan dowliga ahayn, 17 boqolkiibana waxa ay ahaayeen arday. Kudhawaad kalabar, (49 boqolkiiba) waxa ay heysteen shahaadada dugsiga sare, iyada oo 17 boqolkiiba ay dhameeyeen jamacad.

Aqoon-is-weydaarsiyada Heritage ay qabteen waxa ay ku bilowdeen sharraxaad kooban oo ku saabsan cilmi-baaris ciwaankeedu ahaa: Hababka Baahinta Maamulka Soomaaliya oo Machadku uu qoray Febraayo 2014. Taa waxa xigay dood kooxeed, dadkii magaalo kasta ku kulmay ay kooxo afkaarta wadaaga  u kala bexeen. Marka ay dooddu dhamaato, ka qeyb galayaasha waxa la weydiinayay in ay buuxiyaan afti-aragtiyeed ka kooban sagaal su'aal. Marka laga soo tago xogta Dimograafigga, su'aal kasta waxa loo diyaariyay in ay ka caawiso cilmibaarayaasha fahanka kala duwan ee hannaanka federaalka.


Waxa jiray waxyaabo xaddidayo habka diraasaddeenna. Kow, qaar kamid ah ka qeyb galayaasha waxa ay ku adkaayeen aragti ku aaddan Machadka Heritage. Tan waxa si gaar ah uga jirtay Garowe, halkaas oo HIPS looga heystay hay'ad dhiirrigelineysa maamul dowlad dhexe islamarkaana ah saaxiib aad ugu dhaw Dowladda Federaalka, midkoodna sax ma ahayn. Natiijada ka dhalatay aragtidan, qaar kamid ah ka qeyb galayaasha ma aanay buuxinin xog uruurinta, taa oo saameyn ku yeelatay tirada guud. Waxa iyadana lagu doodaa in dadka xog badan la siinyo ka hor xog uruurinta in ay saameyn karto jawaabta ka qeybqaataha. Inkasta oo  tani ay sax noqon karto, xog uruurinta ama afti-aragtiyeedku waxa ay weydiisay in warbixinteenna iyo doodda xigtay ay kor u qaadday heerka fahanka federaalka ee ka qeybgalayaasha, ilaa 73 boqolkiiba ayaana ku jawaabeen haa, waxbaa noo kordhay. Heritage ahaan ma aannan awoodin in aan booqanno Beledweyne oo ah magaalo ka mid ahayd meelaha aan doonayney in aan booqanno sababo ammaan iyo kuwo kale oo la taaban karo awgeed.

## Federaalka Soomaaliya: Ma ahan hadii, laakiin sidee

Tiro aad u badan (68 boqolkiiba) oo kamid ah dadka xog ruurinta laga sameeyay ee ku kala nool shan magaalo ee kala duwan oo taageeray nidaamka maamulee federaalka waxa ay cadeyn u tahay in su'aasha aanay ahayn in federaal la dhaqangeliyo balse ay tahay sidii loo dhaqan gelin lahaa oo ah qaab yareynaya colaadda, kor u qaadaya wadajirka bulshada, iyo ugu danbeyn keenaya maamul xasiloon oo dimuqraadi ah.




Daka doonayay federaalka, afartii qofba mid (24 boqolkiiba) waxa ay tilmaameen in federaalku uu keenayo awood qeybsi, taas oo ah asalka colaadihii dabada dheeraa ee 24-kii sano ee lasoo dhaafay. Taa waxa sii dheer, 23 boqolkiiba waxa ay rumeysan yihiin in uu federaalka abuurayo in ay maamulkooda u madax bannaanaadaan – kaas oo ah dalab muhiim u ah Soomaali badan. 15 boqolkiiba waxa ay federaalka u arkaan aalad muhiim u ah xalinta colaadaha.



## Farqiga Gobollada

Inkastoo guud ahaan dadka ay taageersanaayeen nidaamka maamul ee federaal guud ahaan shanta magaalo, waxa jiray farqi la taaban karo. Magaalooyinka qaar ayaa aad ugu xammaasadeysnaa federaalka marka la barbar dhigo kuwa kale.

## Kismayo

Ka qeybgalayaasha Kismaayo waxa ay ahaayeen kuwa ugu rabitaanka badan hannaanka federaalka iyada oo, 88 boqolkiiba dadka xog uruurinta laga sameeyay ay sheegeen in federaalka uu ku habboon Soomaaliya. 29 boqolkiiba kuwa taageeray hannaanka federaalka waxa ay tilmaameen federaalka waxa uu yahay hannaan muhiim u ah yareynta colaadaha. Tani waxa ay ahayd xog filanwaa ah. Kismaayo waxa ay ahayd magaalo lagu dagaallamayay ilaa 1991-dii. Iyada oo ah magaalada seddexaad ee ugu weyn Soomaaliya iyo mid kamid ah magaaliiyinka Soomaaliyeed ee dadka kala duwan ay ku badan yihiin, dadka qaar badan waxa ay u arkaan federaalka in uu yahay hannaan lagama maarmaan ah ee lagu yareyn karo colaadaha ragaaday.

Si la mid ah dad badan ee waddanka ku nool, in la helo ismaamul-gobol waxa ay ahayd  rabitaan muhiim u ah ka qeybgalayaasha Kismaayo. Kudhawaad afar meelood meel (24 boqolkiiba) waxa ay sheegeen in hannaanka maamul ee federal uu kor u qaadayo in dadka deegaanka ay maamulaan siyaasadda iyo kheyraadka. Halka 26 boqolkiiba ay yiraahdeen federaalka waxa uu keenayaa hab awood qeybsi isla jaanqaadda ee u dhexeeya dadka talada leh ama daneeyayaasha muhiimka ah.

Rabitaanka dadka la waraystay ee Kismaayo ee federaalka taageersan, waxa usii dheer, dadka Kismaayo waxa ay si isku mid ah ugu qanacsanaayeen hannaanka hadda lagu federaaleynayo dalka. Ku dhawaad 60 boqolkiiba waxa ay taageereen habka ay hadda wax ku socdaan. Waa magaalada kaliya oo ay inta badan ka qeyb galayaasha taageereen qaabka ay wax ku socdaan. Ka qeybgalayaasha kale kuma qanacsanayn qaabka ay wax ku socdaan.

## Garowe

Ka qeybgalayaasha aqoon-wadaaggii Garowe, waxa ay ahaayeen dadka labaad ee aadka ula dhacsan federaalka. Tiro aad u badan (69 boqolkiiba) ayaa yiri hannaanka federaalka waxa uu muhiim u yahay in Soomaaliya ay dib uga soo kabato labaatan sano oo burbur dowladeed ah. Ilaa 78 boqolkiiba waxa ay sheegeen in federaalka uu yahay nidaamka ugu haboon. 9% waxa ay doorbideen konsosiyeeshan, kaas oo ah kan ugu baahsanaan badan ee hannaanka federaalka. Ilaa iyo xad, tani waxa ay xaqiiq u tahay xariirka u dhexeeya Puntland iyo Dowladda Federaalka ah. Ujeeddooyin la taaban karo awgeed, Puntland waxa ay qabsataa howlaheeda iyada oo aanay kor kala soconin Dowladda Federaalka ah ee Muqdisho.

Rabitaanka ah in si weyn xukunka loo baahiyo waxa ay noqon kartaa natiija ka dhalatay is aaminaad la'aan baahsan oo ay ka qeybgalayaasha Garowe ka muujiyeen Dowladda Federaalka intii doodda ay socotay.

Garoowe, waa magaala madaxda Puntland iyo maamul goboleedka ugu firfircoon inta la ogyahay. Ilaa 78 boqolkiiba ee ka mid ah kuwa tibaaxay in federaalka habboon yahay, 31 boqolkiiba waxa ay sheegeen in waxa uu ku wanaagsan yahay uu yahay inuu kor u qaadayo madaxbannaanida gobollada. Ku dhawaad afar meelood (22 boqolkiiba) waxa ay tilmaameen in federaalka uu u keenayo awood qeybsi iyada oo 22 boqolkiiba ay rumeysan yihiin in uu federaalku yareynayo colaadaha u dhexeeya bulshada.

## Baydhabo

Baydhabo waa magaala madaxda gobolka Baay iyo mid ka mid ah magaalooyinka ugu waaweyn koonfurgalbeed Soomaaliya. Waa magaalada caasimadda u ah siyaasadda iyo dhaqaalaha maamulka Kumeelgaarka ah ee Koonfurgalbeed (caasimadda rasmiga ah waa magaala xeebeedka Baraawe, laakiin maamuulka wali waxa uu kusii shaqeeyaa Baydhabo sababo la fahmi karo awgood). Dadka magaaladaas dega waxa ay soo mareen dagaallo sokeeye iyo colaado. 1992-dii, waxa lagu naaneesay "magaaladii geerida" sababta oo ah abaarta waxa ay dileysay qiyaastii 500 oo qof maalin kasta. Sidaa si lamid ah 2011-dii, abaartii dhacday waxa la sheegay in ay galaafatay nolosha 268,000 ee kunoolaa Soomaaliya, sida ay qortay Qaramada Midoobay. Tiro aad u badan oo ah dadka ay saameysay abaartan waxa ay kasoo jeedeen gobollada koonfurgalbeed.

Gobolkan waa halka uu ka dhashay "federaal"ka Soomaaliya. Dib hadii loogu laabto 1947-dii, shaqsiyaad sare ee gobolkan kasoo jeeday ayaa dalbaday hannaan maamul ee federaal – taas oo waqtigaas ahayd aragti aad loogu maadsado oo loo arkay in ay ka soo horjeeddey muwaadinnimada. Rabitaanka federaal waqtigaas waxa uu ka yimid xaqiiqda ah dadka degan gobolladan (iyo gobollo kale) in ay ku hadlaan lahjad gaar ah ee loo yaqaanno Maay islamarkaana ay ka shakisanaayeen maamulka SYL, xisbigii xukunka hayay, oo ay hayeen qabiillo gaar ah kuwaas oo inta badan ku hadla lahjadda Maxaa Tiri.

Afar-meelood seddex meel (75 boqolkiiba) dadka ka jawaabay afti-cilmiyeedka waxa ay tilmaameen in federaalka uu yahay xukun baahinta ugu wanaagsan ee Soomaaliya. Sidoo kale 40 boqolkiiba waxa ay la xariiriyeen in ay u madaxbannaanaanayaan gobollada ay deggan yihiin – taas oo ah tirada ugu badan ee shanta magaalo ee ra'yigaas qaba. Tani ma ahan mid layaab leh, marka la eego awood u diididda taariikheed oo ay soo mareen bulshadaas tan iyo xornimadii. Sidaa darteed rabitaanka xooggan ee reer Baydhabo ee ah in ay maamulkooda u madaxbannaanaadaan waa mid lasii saadaalin karay.

Tiro badan (75 boqolkiiba) oo ka mid ah dadka ka jawaabey afti-aqooneedka waxa ay sheegeen in aanay ku qanacsaneyn hannaanka federaaleynta hadda socota. Ku dhawaad kala-bar (46%) waxa ay la xariiriyeen wax ay ku sheegeen hab kor ka keenis ah oo bulshadii laga saaray, lagana qeybgelineynin wadatashiyada iyo go'aan qaadashada.

## Muqdisho

Ka qeyb galayaasha cilmi barista ee caasimaddu waxa ay beeniyeen aragtida tuhun ahayd oo laga qabay. Waxa aad loogu maleynayay in dadka Muqdisho ay yihiin inta badan federaal diid, laakiin tiro aad u badan (73 boqolkiiba) ayaa waxa ay sheegeen in federaalku yahay hab maamulka ugu habboon Soomaaliya. Tani waxa ay noqon kartaa calaamad tusineysa in aragti beddel  ku timid dadka dega caasimadda, iyo xaqiiq u weecasho ah in uu federaalku yahay hanaan lasii ogaa in ay Soomaaliya qaadaneyso.

Si lamid ah magaalooyinka kale, tiro badan oo gaareysa ilaa (56 boqolkiiba) waxa ay ku sheegeen hannaanka federaaleynta dalka ee hadda socda in uu yahay mid khaldan sababtoo ah ma ahan mid cad dadkana ay kawada qeybgalayaan, ayay tilmaameen.

habboon Soomaaliya. Tani waxa ay noqon kartaa calaamad tusineysa in aragti beddel  ku timid dadka dega caasimadda, iyo xaqiiq u weecasho ah in uu federaalku yahay hanaan lasii ogaa in ay Soomaaliya qaadaneyso.

Si lamid ah magaalooyinka kale, tiro badan oo gaareysa ilaa (56 boqolkiiba) waxa ay ku sheegeen hannaanka federaaleynta dalka ee hadda socda in uu yahay mid khaldan sababtoo ah ma ahan mid cad dadkana ay kawada qeybgalayaan, ayay tilmaameen.

## Galkayo (Galmudug)

Gaalkacyo waa magaalo qeybsan. Puntland waxa ay maamushaa qeybta woqooyi ee magaalada. Galmudug waxa ay sidoo kale maamushaa qeybta koonfur, halkaas oo aan ka sameynay xog uruurinta. Kala qeybsanaanta waa mid qoto dheer taa oo keentay in dadka intooda badan aanay isku gudbin xuduudda qarsoon ee labada maamul. Kala qeybintan waxa ay dib ugu laabanaysaa bilowgii dagaalkii sokeeye, waqtigaas oo bulshada degta labada qeyb ee magaalada ay wada gaareen heshiis taariikhi ah 1993-dii. Heshiiskaas waxa uu soo jiray ilaa 20 sano.

waxa uu soo jiray ilaa 20 sano.

Marka laga soo tago mowjadihii aragtiyada, ka qeyb galayaashа koonfurta Gaalkacyo waxa ay ahaayeen kuwa ugu badan ee diiddan federaalka. 58 boqolkiiba ayaa tilmaamay in federaalku aanu ku habboonayn Soomaaliya. Afar-meelood hal meel (25 boqolkiiba) waxa ay yiraahdeen federaalka waxa uu dib u soo celinayaa colaadihii qabiillada. 9 boqolkiiba ayaa sidoo kale aaminsan in uu federaalku qatar ku yahay midnimada Soomaaliyeed.

Tiro mug leh oo gaareysa ilaa 46 boqolkiiba waxa ay ku jawaabeen hab maamulka dowlad dhexe oo xukunka daadajisa in uu yahay kan ugu habboon Soomaaliya. Culimada siyaasadda waxa ay sheegaan xukun daadejintu in uu yahay kan ugu daciifsan hababka federaalka, dowladda dhexe ayaana wali heysata awoodo muhiim ah. Kenya ayaa waqti dhaw qaadatay nidaamkan.

Koonfurta Gaalkacyo waxa ay ahayd magaalada labaad ee ugu sareysa ku qancid la'aanta hannaanka fedreaaleynta hadda socota (65%). Tan waxa ka tarjumeysaa aragtida guud ee federaalka laga heysto qeybtan koonfurta Gaalkacyo.

Tiro muhiim ah ee ka mid ah ka qeyb galayaasha waxa ay sheegeen in dib u heshiisiin bulsho ay tahay shardi ka horreeya dhaqan gelin guuleysata ee federaalka Soomaaliya ah. Tiro badan ayaa sheegtay in dhaawacyadii dagaalkii sokeeye aanan wali la bogsoon.

## Gunanad

Daraasaddan waxa ay daaha ka rogtay in tiro aad muhiim ah oo Soomaaliyeed ay doonayaan habka maamulka federaal, inkasta oo uu jiro walwal aad u badan. Inta badan dadka xog uruurinta laga sameeyay waxa ay u doorbidayaan federaalka si uu u keeno nidaam awood-qeybsi u dhexeeya qabiillada Soomaaliyeed. Hab maamul kor ka yimaada lehna dowlad dhexe ee awood badan waxa ay u arkaan dadka mid aan dimuqraadiyad ahayn iyo sidoo kale mid cadaadis iyo caddaalad darro badan wata. Dadka waxa ay dalbanayaan awood siman taa oo ay heli karaan heer saameyn kufilan suuragalna ah dhanka maamulka deegaannada.

Dhaqan gelinta federaalka waa mid horey u socotay. Inta badan ka qeybgalayaasha daraasaddan, sikastaba, waxa ay u arkaan habka ay hadda wax ku socdaan mid jaahwareer wata sidoo kalana keeni kara colaado kale. Nidaamka xuquuq dhowrista iyo awoodaha dastuuriga ah waa layska indha tiray diiraddana waxa laga weeciyay sameynta wixii saxda ahaa, iyada oo taa lagala gol leeyahay si saameyn loogu yeesho hanaanka maamul ee baddeli doona dowladda hadda jirta sanadka 2016.

Madaxbannaanida gobollada sidoo kale waxa ay noqotay mid ay aad u dalbadeen Soomalalida ku dhaqan dalka. Inta badan ka qeyb galayaasha waxa ay sheegeen in ay doonayaan federaal sababta oo ah federaalka waxa uu siinayaa maamulkooda hoose madaxbannaani. Iyada oo madaxbannaanida gobollada ay ka imaaneyso in dadka deegaanka ay maamulaan awoodda iyo khayraadka (ugu yaraan aragti ahaan). Xaqiiqda jirta, hogaamiyayaasha dowlad/maamul goboleedyada sameysmay ama hadda sameysmaya ayaa si adag u koontroola dhammaan waxyaabaha la xariira maamulka sida magacaabista guddoomiyayaasha degmoyinka iyo agaasimayaasha waaxyaha.

Natiijo kale oo muhiim ah waa xariirka ay ka qeyb galayaasha daraasadda ay u sameeyeen federaalka iyo xalinta colaadaha. Dooddooda waxa weeye, haddii awooda la daadajiyo, in hardanka uu yaraanaayo islamarkaana iskaashi badan uu dhexmaraayo bulshooyinka. Mar labaad, si fudud ayaa loo yiri, si ka duwan waxa la sameeyay, laakiin xaqiiqda ah in in ka badan seddex meelood jawaabayaasha ay isla xariiriyeen waa muhiim.

Mid ka mid ah natiijooyinka ugu cad-cad daraasaddan ayaa ah rabitaanka ah dib u heshiisiin bulsho in ay ka dhacdo Soomaaliya oo dhan. Kasoo bilow Kismaayo ee dhacda koonfurta ilaa Garowe ee iyadana dhacda Waqooyi Bari, ka qeyb galayaasha daraasadda waxa ay diiradda saareen baahida loo qabo dib u heshiisiin toos ah ee dhex marta bulshada Soomaaliyeed. Waxa caddaa waxa dadka ay ku baaqayeen in aanay ahayn xasilooni siyaasadeed laakiin ay doonayaan dib u heshiisiin qaran ee dhab ah taa oo dhaqda boogihii dagaalladii sokeeye.

Ugu danbeyn, baahida loo qabo wacyi gelin bulsho aya ah mid muuqata. In ka badan 70 boqolkiiba dadka ka jawaabay su'aalaha cilmi-baarista waxa ay sheegeen in ay wax badan ka barteen daraasadda kusaabsan federaalka inta lagu guda jiray soo jeedinteenna iyo dooddii ka danbeysay. Tiro badan waxa ay carrabka ku adkeeyeen in kiis-iska-waal ay dad badan ka hor mariyaan wadahadal dhab ah oo ku saleysan xaqiiq.

## Talooyin tixgelin mudan

Federaalku waa hannaan maamul ee mug-weyn lehna dhowr heer ee maamul. Haddana waa doorasho dastuuri ah iyo xaqiiq ka jirta dhulka maanta. Dadka siyaasadda dejiya waxaan aad ugu tir-tirsiinaynaa in ay tixgeliyaan talooyinka soo socdo maaddaama hanaanka federaalaynta dalku uu gebi-dhaclaynayo.

Kow, Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waa in la sameeyaa sida ugu dhaqsiyaha badan. Waa mid dhiirigelin leh in sharcigii uu ku shaqeyn lahaa guddiga uu baarlamaanku ansixiyay. Khuburo aqoon iyo karti leh waa in loo xilsaaraa fulinta howshan muhiimka ah. Laakiin taasi waa midda ugu fudud: guddiga waxa uu u baahan doonaa taageero siyaasadeed, mid maaliyadeed iyo mid sharci si uu ugu fuliyo howlihiisa si xirfad leh uguna fiican. Mudnaanta ugu muhiimsan guddiga waxa ay noqon doontaa in uu safaro ku bixiyo waddanka oo dhan, islamarkaana dhageysto rabitaanka muwaadiniinta isaga oo sidoo kale tixgelinaya duruufaha dhaqaale iyo sharci ee maamullada sameysmaya. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waxa uu shaki la'aan wajahi doonaa caqabado fara badan, balse waa in uu ahaadaa mid ku dhegan hadafkiisa.

Labo, Guddiga Isku-xirka Gobollada waa in sidoo kale la sameeyaa iyada oo aan laga dibdheceynin. Sida ku xusan hiigsiga 2016, guddigan waa in uu noqdaa madal lagu dhan yahay oo ay maamullada jira iyo kuwa sameysmaya uga doodaan arrimaha masiiriga ah si loo helo xal waara oo loo dhan yahay. Maamullo badan waxa ay wadaagaan xuduudo, qaar ayaa xitaa wadaaga caasimado. Kuwa kale kheyraadka ayeey wadaagaan. Kaliya arrimahooda waxa ay ku xallin karaan wadahadal dhexdooda ah.

Seddex, dib u heshiisiin bulsho waa muhiim. Boogihii colaaddii sokeeye wali si fiican looma dhayin. Meelaha qaar, hanti sida guryo iyo beero ayaa si sharci darro ah lagula wareegay. Tani ma ahan mid la aqbali karo, waxa ayna noqon doontaa mid caqabad weyn ku noqota dib u heshiisiin dhab ah. Hiigsiga 2016 waxa uu sheegayaa sameynya Guddiga Runta iyo Dib u Heshiisiinta. Guddiga oo ka koobmaya shaqsiyaad qaranka sumcad weyn ku leh waxa ay u istaagi karaan dhaqidda boogihii colaaddii sokeeye iyaga oo ugu danbeyn keenaya isku soo dhawaan dadka intooda badan.

Afar, olole wacyi gelin bulsho aad u ballaaran ayaa loo baahan yahay. Federaalku si kala duwan ayaa loo fahansan yahay. Xitaa inta badan dadka taageersan waxa ay heystaan turjumaad u gaar ah, oo ay ka mid tahay aragtida ah in uu federaalku yahay in qabiilkooda uu ka madaxbannaanaayayo qabiillada kale. Kuwa diiddan waxa ay u arkaan in uu yahay aalad lagu kala qeybinayo Soomaaliya dad shisheeyana ay soo abaabuleen. Labadaba waa in la fahansiiyaa aragtida in hanaanka federaalku uu yahay mid midabyo badan si loo fahmana u baahan maan deggen iyo maskax la waasiciyo.

Akhristayaasha waxaa la ogeysiinayaa inay daabici karaan qoraalkan, haddii aaney ka ganacsaneyn. Maadaama uu Machadka Heritage leeyahay xuquuqda qoraalka, waxaa laga codsanayaa ciddii dibu u daabacda inay xusto Heritage, isla markaana Machadka lasoo socodsiiso.

**© Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda. Qoraalkan waxaa lagu daabacay hannaanka Creative Commons Attribution, qaybtiisa aan macaash-doonka aheyn (CC BY-NC 3.0)**